Qaraxyada

Waxaa cajaladdan tafrighinteeda soo diyaariyay walaalaha maktabada.com.
Waxaannu Allaah weydiisanaynaa in uu nagu anfaco kana abaal mariyo sheikheena Sheikh Cuthmaan macallin.

Jazakumullahu khayran sheykhanaa su'aasha ku sii xigta waxay tahay: diintu maxay ka qabtaa qofka muslimka ah in uu naftiisa ugu badlo oo 100 gaalo ah inta uu isku dhax rido isagu is qarxiyo si uu muslimiinta ugu faa'iideeyo?.

Jawaab: Bismillaah, waxaannu leennahay:

Horta jihaadku waa in gaalada lala diriro iyadoo ujeedkuna yahay in kalmadda Alle kor la yeelo, waana cibaado cibaadooyinka ka mid ah sidii Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) u jihaadi jiray oo khulafaa'u raashidiin u jihaadi jireen, in aan u jihaadno ayaa loo baahan yahay.

Muslimiintu goormay jihaadaan? waxay jihadaan markay awood leeyihiin oo jihaadka dalabka la yiraahdo oo ay ayagu gaalada raadsanaayaan, waa mar ay awood leeyihiin oo ay awooddii muslimiinta iyo gaaladu iska agdhawdahay. Rajo weynna laga qabo, dadkaasi in ay soo islaamaan ama ay soo hoos galaan maamulki islaamka. jihaadku waa: in Allaah dartiis loo dagaallamo si kalimadda Alle ay kor u noqoto.Dadkiina "laa ilaaha illallaahu muxameddu rasulullahi" yirahdaan oo ay u hogaansamaan, oo u qabsadaan islaamkii si ay Aakhiro u badbaadaan, ujeeddada weyni waa taa, haddii kale in sharkooda laga badbaado oo aanay fidnaynin qofkii raba in uu soo islaamo, ujeeddada weyn ee laga leeyahay waa taas.

Haddaanu jirin jihaadkii la aqoon jiray oo muslimiintii oo xoog leh oo dhinac ah oo calankoodu u taagan yahay, lana yaqaan oo bannaanka taagan, ninkii madaxda u ahaana uu bannaanka joogo, lana heshiin karo cadowga haddii loo baahdo, hadba duruuftu sida ay tahay, muslimiinta dhulkii ay asalka u lahaayeenna uu ilaashan yahay oo aan looga baqaynin

dabargoyn, dagaalka noocaas oo kale ah ee xilligii Nabiga (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) dhacaayay iyo waqtigii saxaabada markuu jiro ayaa wax la iska weydiin karaa qof naftiisa qatar galiya oo gaalo meel joogta isku tuura oo markaas muslimiinta maslaxo uga soo xasisho.

Laakiin hadda ma muuqanayso wax noocaas oo kala ah, dadkii muslimiinta ahaa haddaanay awood u lahayn gaaladii in ay la dagaallamaan oo dhulkoodi asalka ahaa u bad qabo, xooggooduna la mid yahay ama ka agdhow yahay kan gaalada, haddaanay taasi jirin isqarxintii gaalada lagu sameeyaahi waxay ka dhigan tahay adigoo gaaladii kaa xoogga badanyd ee waxyaabo fara badan oo wax lagu burburiyo haystay adigoo leh kaalaya muslimiinta burburiya, adiguna kuuma dammaanad qaadna waxa aad samaynayso in uu muslimku faa'iido ka helaayo, taa macnaheedu waa maxay? gaalada uunbaan dhibayaa sharkii baan muslimiinta ka kala yareynayaa wax noocaas oo kale ayuu qofku isleeyahay, laakiinse waxaa muuqanaysa in dhibka la sii badinayo. dagaalkii la aqoon jiray ee muslimku ribix radinayeen ra'su maalkooduna u caafimaad qabay ma jiraa hadda mise ma jiro?
Jihaad dalab ah oo shuruudihii u dhammaysan yihiin hadda iima muuqdo, haddii runta laga hadlo, oo aannan been isu sheegayn.

waxaa soo haray midka dafciga lagu magacaabo, asaga laftigiisa dadka muslimiinta ahi haddii ay ka baqayaan dabargoyn ama wixii ay sameeyaan dhib ka weyn inuu ka imaanayo meeshii ay islahaayeen ayagu maslaxad ummadda u keena isaga laftigiisa waa in ay ka joogaan, daruuradu axkaamteeda u gaarka ah ayay leedahay sida ahlucilmigu sheegeen, imaamu shaaficina ka mid yahay.

Mas'alada mas'ala ahaan bay ahlu cilmi badan uga hadleen oo mashaa'ikhdii waqtigan joogay ee salafiyiinta ahaa, sida Sheikh Ibnu Baaz oo kale, Sh. Ibnu cuthaymiin, Sheikh Salix fawzaan iyo Aa'imo kaloo cilmi waxay yirahdeen qofka muslimka ahi in uu naftiisa dilo ma bannaana.

Mas'aladani waxay ka mid tahay kuwa lagu magacaabo Naazilada.
waxay muslimiintu aqoon jireen ma ahan in qofka muslimka ahi isagu isku soo xiro wax qarxiya ama uu baabuur ka soo buuxsado oo uu u qasdo in uu naftiisa dilo asagoo doonaya in uu gaalo dhib gaarsiiyo.
waa Naazilo, Naaziladanna ahlu cilmiga lagu kalsoon yahay waxay ka yiraahdeen waxaasi ma bannaana.

Teeda kale maslaxo muslimka uga soo xasishay garan mayno, waxaad mooddaa wixii ugu muuqday ee waqtigan dhaca waxay noqotay wixii Ameerika lagu sameeyay; labadii daaroood ee la burburiyay oo uu Bin laadin sheegtay oo uu yiri: waxaa anaa ka danbeeyay.
waxa noocaas oo kale ahi muslinku ma faa'iido bay ka dhaxleen mase waxay ka dhaxleen dhibaato iyo in noloshii lagu ciriiriyay, gaar ahaan dadkii galbeedka degganaa, waddammadii muslimiintana culays fara badan la saaray iyo waxaanay ka bixi karin iyo waxaanay awood u lahayn, oo markaa lagu qasbay dadkii muslimiinta ahaa waxaanay awood u lahayn iyo dagaal aanay u tabaabushaysan oo aanay tabartiisa haynin, marka waxa noocaas oo kala ah oo dadka qaarkood is leeyihiin islaamka ayaad ugu gargaaraysaan, ma ahan wax islaamka loogu gargaarayo, haddaba islaamka maslaxo ugama xasilin, dhib baa uga xasilay.
Niman naga waaweyn ayaannu isku daandaansannay dhib fara badanna waa na soo gaaray.
Markii ay arrintaasi ka dhacday maraykanka wixii ka danbeeyay waan ognahay wixii afghanistaan ku dhacay, kadibna ciraaq baa ka danbeysay iyo culeyska meel kasta la saaray, oo waddanka Soomaliya ka mid yahay.

Qofku waa in uu ka fiirsadaa waxa uu samaynayo, asagoo janno raadinaya haddii waxa uu sameeyay noqdaan qof naftiisa dilay oo uu ku rumoobo qowlkii Allaah sarreeyee:

﴿ وَلَا تَقْتُلُوٓاْ أَنفُسَكُمْۚ إِنَّ ٱللَّهَ كَانَ بِكُمْ رَحِيمًا وَمَن يَفْعَلْ ذَٰلِكَ عُدْوَٰنًا وَظُلْمًا فَسَوْفَ نُصْلِيهِ نَارًاۚ وَكَانَ ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ يَسِيرًا ﴾ النساء: ٢٩ - ٣٠

Alle wuxuu na leeyahay: **naftiinna ha dilina Alle waa mid adinka idiin naxariis badan eh. Qofki sidaa u sameeya xadgudub iyo dulmi, naar baan gelinaynaa, arrintaasina Allaah way u fududdahay**.
Haddaba haddii lagaa reebay naftaadi inaad disho adoon muslin kale dhib u geysaneyn oo sidaas cadaab ku mutaysanayso, bal ka warran haddii lugu sii daro is dilka aad is dishay inaad muslin kale galaafato.
Sidoo kale waxaad halis u tahay inuu kugu rumoobo Xadiiskii ahaa:

عن أبي هريرة رضي الله عنه عن النبي صلى الله عليه وسلم قال:(من تردى من جبل فقتل نفسه فهو في نار جهنم يتردى فيه خالدا مخلدا فيها أبدا ومن تحسى سما فقتل نفسه فسمه في يده يتحساه في نار جهنم خالدا مخلدا فيها أبدا ومن قتل نفسه بحديدة فحديدته في يده يجأ بها في بطنه في نار جهنم خالدا مخلدا فيها أبدا) هذا لفظ البخاري.

ولفظ مسلم: عن أبي هريرة قال قال رسول الله صلى الله عليه وسلم: (من قتل نفسه بحديدة فحديدته في يده يتوجأ بها في بطنه في نار جهنم خالدا مخلدا فيها أبدا ومن شرب سما فقتل نفسه فهو يتحساه في نار جهنم خالدا مخلدا فيها أبدا ومن تردى من جبل فقتل نفسه فهو يتردى في نار جهنم خالدا مخلدا فيها أبدا).

Iyo lafdigii kale:

(الذي يخنق نفسه يخنقها في النار، والذي يطعنها يطعنها في النار) وهو عند البخاري في أواخر الجنائز.

Qofkii naftiisa bir ku dila birtii buu gacanta ku haysanayaa oo naarta jahannamo galayaa oo markaasuu calooshiisa mar kasta ku mudayaa birta, qofkii sun cabbaa sidoo kale suntii buu naarta jahannamo ku cabbayaa, qofkii buur iska soo tuura oo naftiisa sidaas ku dila buurtii buu mar walba iska soo tuurayaa naarta jahannamana saas buu ugu jirayaa.
Qofkii naftiisa sirqiya ama neefta isku celiya oo sidaa isku dila sidoo kale ayuu jahannama isugu cadaabaayaa, waxaa aad looga baqaa qofkii suun qarxa isku xira in naarta jahannamo lagu cadaabo, waa arrin aad u khatar badan, adoo janna raadinaya in aad naar ku gashaa waa dhibaato aad u fara badan.
Dadka walaalahaya ah waxaan ugu naseexaynayaa in aanay arrimaha noocaas oo kale ah fududaysan.

Qaarkood baa waxay soo daliilsadaan: nin baa meel dhufays ah oo gaaladu ku jirtay loona gali karin isku tuuray si uu albaabka ugu furo dadka muslimiinta ahaa, taasina daliil ma noqonayso. ninkaasi isagu horta naftiisa ma aanu dilin oo gaalo fara badan buu dilay albaabkiina wuu furay, maslaxo baa ka dhalatay wixii uu sameeyay, ninkaasi naftiisa uma qasdin ee gaalaa dishay.

agtiisa raajix ha ka ahaatee inaanu gaalada ka badbaadeyn, laakiinse damac yar waa jiray inay dhici karto in uu ka badbaado, waxbuu asagu dilaayay muslimiintana albaabkuu u furaayay, dan guud oo jihaadkii muslimiinta u soo xasishay ayaa meesha ka dhacday ee ninkaasi nin asagu is dilay ma ahan.

Is qarxin wax la aqoon jiray ma ahan.

Qaarkood waxay soo daliilsadaan wiilkii yiri ninkii gaalka ahaa ee boqorka ahaa ima dili kartid aniga ilaa sida aan kuu sheegayo aad samayso ma ogiye. taasina daliil kuma jiro, oo wiilkaasu isma aanu dilin, bal e in la dilo markii la rabay Alluu baryay markaasaa la dili kari waayay. Sheekadu way dheer tahay qaar baanse ka soo qaadanaynaa.
Boqorki wuxuu damcay inuu wiilka ku cabsiiyo nin raahib ahaa oo cibaadada Alle u go'ay iyo nin boqorka la saaxiib ahaa oo labadiiba uu dilay ....labadaba mid kasta waxaa madaxa laga saaray miinshaar oo jirkiisa oo dhan la kala gooyay labadoodiina saas ayay ku dhinteen.
markaasaa wiilkii la keenay war diinkaada ka noqo ayuu ku yiri boqorkii, wiilkiina waa uu diiday, markaasuu rag ciidankiisa ka mid ah u dhiibay oo wuxuu ku yiri: buurtaas geeya oo meesha dhaladeeda ah markaad joogtaan hadduu diintiisa ka noqon waayo ka soo tuura, way wadeen oo buurtii la fuuleen, kolkaasuu wiilkii ducaystay oo wuxuu yiri:
Alloow iiga kaafi nimankaas wixii aad doonto oo iga celi nimankaas, buurtii baa la gilgilatay markaas bay iyagii soo daateen asagoo soconaaya buu yimid, markuu boqorkii u yimid buu yiri: aaway dadkii aan kugu daray? Allaa iga badbaadiyay buu ku jawaabay wiilkii.
Markaasuu kuwa kale u dhiibay wuxuu yiri badda geeya oo doon raaca, haduu badda dhax bartankeeda kaga soo noqon waayo diintiisana badda ku tuura, way isku dayeen, baddii bay dhax galeen markaasuu haddana

ducaystay oo wuxuu yiri:Alloow igaga kaafi nimankaas wixii aad doonto oo iga celi. saa doontii baa la qallibantay markaasay iyagiina baddi laqday oo meshii ku baaba'een asagiina ka soo badbaaday.
Markaasaa wiilki isagoo socda boqorki u yimid, boqorki wuxuu yiri: maxay sameeyeen raggii aan kugu daray? wuxuu yiri: Allaa iga badbaadiyay, markaasaa wiilkii wuxuu ku yiri boqorkii:
war aniga ima dili kartid ilaa aad ka samayso waxa aan ku farayo.
markaasuu yiri waa maxay oo maxaan sameeyaa?
wiilkii baa wuxuu yiri: dadkii baad isugu keenaysaa meel bannaan, waxaad igu daldalaysaa jiriddii geedka oo taagnayd kadibna leeb kala soo baxaysaa qoonihii fallaaruhu kuugu jireen, markaad rabto in aad igu soo tuurto ayaad oranaysaa: magacii Alle ayaan rabaa in aan wax ku dilo ama ku tuuro, markaas ayaad tuuraysaa.
Hadaad sidaas samayso ayaad idili kartaa, markaasaa dadkii la isku keenay geedkii baa laga taagay, leebkii baa dhafoorka uga dhacay meeshii uu uga dhacay ayuu gacantiisa saaray markaasuu wiilkii dhintay.

wiilka ma asagaa is dilay mise waa la dilay?
waa la dilay, marnaba la dhaafi mayn mararkii hore Alluu baryay nimankii in ay dilaan waa laga badbaadiyay.
haddaba waxaa timid maslaxa ah in ay dadkii oo dhan soo islaamaan ninkaan boqorka ahina ma oga, waxba ma garto.
Arrintaas baa Alle wiilkii waafajiyay, wuxuu yiri sidaas uun baad igu dili kartaa.
gacantiisa iskuma aanu dilin isagu, faa'iido weynna waa ka dhalatay, ummaddaas oo dhan way soo wada islaamtay, markaasaa dadkii waxay yiraahdeen:Aamannaa birabil ghulaam,Aamannaa birabil ghulaam. Aamannaa birabil ghulaam.
waxaa Rabbi noo ah wiilkaas la dilay Rabbigii.
boqoryahoow waxaad tahay ma leh weeyaan macnaheedu, wuxuu ka digtoonaa ayaa ku dhacay ninkaa miskiinka ah jaahilnimadiisa, dadkii waa soo islaamay wiilkii uun baa la dilay.

waxaa dhacaday markii dadkii islaameen buu sii xanaaqay.
oo wuxuu yiri: dadkaan hala soo qabqabtoo dhulkana godad halaga qodo

dabna halagu shido qofkii ka soo noqon waaya diinka uu hadda qaatay iyo islaamkan uu islaamay halagu tuuro dabkaas holcaaya.
dadka waa ka xoog badan yahay, ciidan buu haystaa, dadkiina waa masaakiin, dadkii saas ayaa la yeelaayay, qofkii diida in uu galoobo waa lagu tuuraayay. markii danbe haweenay baa timid wiil yar bay wadatay, markaasey xoogaa ka joogsatay in ay ku dhacdo dabkii, ilaahay baa cunugii ka hadalsiiyay oo yiri: hooyooy iska sabar xaqii baad ku taagan tahay e.
macanaha haddii la dilo maadaama ay islaam ku dhimatay, jannadii bay horay ka galaysaa, sidii bay dabkii ugu dhacday.
sidaas baa ku dhacday ninkii boqorka ahaa, wiilkuna wuxuu sameeyay taas uun bay ahayd. marka dadkii aan awoodda lahayn waa kaasaa diinkoodii saxda ahaa bay ku sabreen xattaa hadii la dulmiyo jannay galayaan, laakiin wax muslimiintii guud ahaan dhib u keenaaya ma samaynin, dadkii wanaagsanaa way sabreen, markaasaa ayagii la dilay.

Arrintu si kastaba ha ahaatee qaarkood baa waxay haddana soo daliilsadaan xadiis baa la wariyay bay yirahdaan oo bukhaari weriyay oo Rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) markii waxyiga lagu soo dajinaayay, riyo run ah ayaa lagu billaabay, markaasey run noqon jirtay, markaasuu buurta xira imaan jiray oo Alle ku caabudi jiray ilaa uu malaggu uga yimaado oo waxyigu ku soo dago, markii uu waxyigu ku billowday kadib ayuu haddana xoogaa joogsaday, oo Rasuulki (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) tiiraanyooday. marka warkaas yaa wata, intaan danbe oo qisada waxyiga ka sheekaynaysa iyo wixii rasuulka (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) sameeyay Zuhri baa wata oo wuxuu leeyahay: fiimaa balaganaa, tiiraanyada uu tiraanyooday wuxuu damcay in uu dhowr jeer buur dhaladeed iska soo tuuro Rasuulku (ammaan iyo nabadgelyo korkiisa ahaataye) sidaas ayaa na soo gaartay buu leeyahay Zuhri, markuu damco in uu isa soo tuuro jibriil baa u imanaayay oo oranaayay Rasuulkii Alle baad tahay e, shakina kuma jiro e joog, markaasuu xasilaayay oo naftiisu qaboobaysay, haddana markuu waxyigu ka daaho ayuu sidoo kale yeelaayay markaasaa jibriil u soo baxaayay.
Arrintu si kastaba ha ahaatee warkaasi war saxiix ah ma ahan oo balaagan Zuhri mid saxiix ah ma ahan oo shardigii bukhaari kuma soo aroorin.

illeen bukhaari axaadiistiisa kuwa ragga weriyay ay isku tixan yihiin, oo kala go' aanu ku jirin, weeye kuwa saxiixa ahi, laakiin wixii balaaga, kaasoo kale waa saxiix lama lahan.

Arrintu si kastaba ha ahaatee qof in uu naftiisa iska dilo asagoo leh waxaan rajeynayaa in islaamkii gargaarsado ma ahan wax u furan, naftuna wax aad adigu iska leedahay ma ahan oo sida aad rabto ka yeeli karto, ammaana ayay kugu tahay.

Jihaadkii saxda ahaa oo la aqoon jiray markuu jirana jihaad, markii kalana iska dulqaado oo sabar, diinkaadana ku dhagganow, taasuu jihaadkii saxda ahaa ku jiraa.

wa bilaahi tawfiiq.